

**SPPS**  
ONLINE  
SCHOOL



Iskoolka la dhaho Online School ee SPPS waa dugsi cusub oo lacag la'aan ah oo ay furtay degmada Saint Paul Public Schools. Wuxuu ardayda dhigato fasallada K-12 u oggolaanayaa inay qaataan fasallo buuxiya heerarka waxbarasho ee Minnesota, lehna jawi waxbarasho oo dabacsan, ammaan iyo caawinaad fiicana leh.

## MAXAAD ISUGU QORAYSAA ONLINE SCHOOL EE SPPS?

### 1 SHAQAALE AAMIN AH

Ardaygaagu wuxuu heli doonaa macallimiin SPPS ah oo khibrad leh oo loo tababaray inay wax ku baraan online-ka kuwaasoo leh xirfado fiican oo ah sida dadka loola shaqeeyo.

### 2 NATIJOOYINKA

Manhajka Online School ee SPPS waxaa la dejiyay iyadoo la adeegsanayo xeelado la xaqiijiyay inay ka shaqeynayaan fasallada lagu barto khadka internetka. Ardayda waxaa la siiyaa fursado ay ku doortaan sida ay ula falgalaan duruusta una muujiyaan waxay baranayaan.

### 3 JADWAL DABACSAN & SAHLAN

Ardaygaagu wuxuu helayaa xiisado toos u baxayo, fasallo leh is-dhexgal iyo wadashaqeyn kuwaasoo ay weheliyaan duruus la duubay oo ay xilli dabacsan oo ardayda u shaqeeyo ay duruustan duuban ka shaqeyn karaan waqti iyo goob iyaga u habboon. Jadwalka dabacsan ayaa sidoo kale u oggolaanaya ardayda inay si fudud ula xiriiraan macallimiinta marka ay u baahdaan hagid iyo tusaalayn.





## ISKOOLKA SPPS ONLINE SCHOOL MA DOOKHA UGU FIICAN BAA EE ARDAYGEYGA & QOYSKAYGA?

Iskoolka SPPS Online School waa fursad weyn oo loogu talagalay **ARDAYDA** kuwaas oo:

- Jecel waxbarashada online-ka
- Doonayo inay helaan waxbarasho qof ahaan ah
- Mirodhal ka keeno markii ay wax ku bartaan jebi deggan oo aysan jirin cid hareerahooda joogto oo mashquulinayso
- Aan jecleyn ama aan natiijo fiican ka keenin markii ay joogaan iskoollada caadiga ah
- Haysto shaqo iyo/ama mas'uul ka ah qoys kuwaasoo adkeyneyo imaanshaha iskoolka inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee iskoolka
- La kulmo welwel xagga dhexgalka bulshada ah ama qabo arrimo kale oo xag caafimaad ah
- Waa cayaartooy ama farshaxan-sameeye u baahan inay jadwalkooda ka helaan wakhti dabacsan oo dheeraad ah
- Leh khibrad ku aaddan waxbarashada guriga lagu qaato
- Qiimeeyo inay helaan fursado ay ku doortaan sida ay wakhtigooda u isticmaalayaan oo ay u gelinayaan waxbarashadooda

Iskoolka SPPS Online School waa fursad weyn oo loogu talagalay **QOYSASKA** kuwaas oo:

- Doonayo isbeddel deegaan oo uu ardaygoodu helo
- U baahan in ardaygoodu uu maalintii caawinaad dheeraad ah siiyo xubno qoyska ka tirsan oo guriga joogo
- Leh xubno qoyska ka tirsan oo joogo gurigooda kuwaasoo aad ugu nugul dhibaatooyinka ka yimaada COVID-19 ama cudurro kale
- La kulmo dhibaatooyin xagga gaadiidka ah markii ay ardaygooda keenayaan iskoolka
- Sameeyo socdaal badan

Wixii xog dheeraad ah, booqo

[www.spps.org/onlineschool](http://www.spps.org/onlineschool)

[facebook.com/SPPSOnlineSchool](https://www.facebook.com/SPPSOnlineSchool)